A L L I A N C E

ACTion

INFORMATION SHEETS

# Qorshaynta Waxbarashada Gaar ahaaneed. (IEP) ee ilmahaaga. Tusaalo yar oo tixgalin ah

**Planning Your Child's Individual Education Program (IEP) : Some Suggestions to Consider**

## Kulanka IEP ka hor :

- Ka fiirso waxa aad ilmhaaga ladamacsantahay iyo meesha aad larabto sanadka dambe.
- Qoro waxyaabaha ilamhaagu ku fiicanyahay, waxa uu ubaahanyahay, iyo waxa uu xiiseeyoba Qoraal ku muuji waxyaabaha aad dareen ka qabto.
- Ka fiirso sida laxaad li'ido waxyeelo ugu keento waxbarashda ilmahaaga.
- Ka fiirso hor umarka xaga waxbarashada ee ilmahaaga. Waxa u hirgalay? Iyo waxa aan u hirgalin.
- Waa in aad gacanta ku dhigta koobi ku saabsan go'aanka qiimaynta ilmahaaga inta ka horaysa Kulanka IEP. Amaba isku day in aad la kulantid qof ka mid ah iskuulka si aad ugala hadsho Qiimaynta ilmahaaga. Taas waxa ay ku soorto galinaysaa sidii aad u ogaan lahayd baahida ilmahaaga Inta kulanka IEP ka hor.
- Waa in aad u fiirsataa go'aanka qiimaynta. Ma wax ilmahaaga khuseeya miya? Qiimayntu ma mid dhamays tiran baa?. Ma mid sax ah baa?. Hadii aanad ku raacsanayn go'aanka, waxa aad codsan kartaa qiimaynta ka madax banaan iskuulka (IEE) oo ah lacag la'aan. Taana waxa sameeya koox ka madax banaan dagmada waxbarashda. Kharashkana waxa bixiya iskuulka ama in ay kulan dhex dhexdhexaadin ah ku muujiyaan in qiimayntoodu ay tahay mid sax ah. Go'aanka qiimaynta madax banaan waa in uu noqdaa mid kooxdo ay tix galiso.
- Ka caawi ilmahaaga sidii uu iskii ugu doodi lahaa isaga oo wax ka baranaya habka dareeqa IEP. Kaga bilow ilmuhu inta uu yarayahay ka qayb qaadashada habak waxbrashda. Isku day hub kala gadisan oo loo qoro IEP sidii uu uga qayb qaadan karo. In aad iskaa isugu doodi kartaa waa muhiim.
- Isku day in uu qof kale oo aqoon u leh ilmahaaga kuu soo raaco kulanka IEP. Qofkaasina waxa uu noqon karaa ninkaaga/xaaskaaga, qaraabo, ama saaxiib. Waxa kale oo uu noqon karaa qof ku lug leh xaga waxqabadka, qof u dooda waalidka oo ka socda ururada caawiyaa caruurta laxaadka la'a.

## Marka kulanka kooxda IEP :

Kulanka IEP waa muhiim. Qof walaba oo ka mid ah kooxda waxa ay ka hadlaan qiimaynta ilmahaaga. Ula jeedaduna waxa weeye si looga wadahadlo waxyaabaha ilmuhu ku fiicanyahay iyo baahidiisa si loogu dajiyo qorshaha waxbarashada gaar ahaaneed IEP (Individualized Education Program). Kulanka IEP waxa uu fursad kuu siinayaa in aad su'aal waydiiso iyo in aad warbixinta la wadaagto. Ogow, adiga waalidka ah ayaa ilmahaaga uga aqoon badan qof walba. Shaqaalaha iskuulku waa in ay ku waydiiyaan adiga ilmuhu sida uu ku yahay guriga iyo bulshada. Waa in ay fahmaan waxa uu ilmahaagu jecelyahay iyo waxyaabaha uu ku firfircoonyahay.

- Waa in aad la socodsiisaa oo ayna marnaba iloobin in kulanku ku saabsanyahay ilmahaaga.
- Isku day in aad kooxda u sheegto wixii aad ilmahaaga la damacsantahay mustaqbalkiisa
- Ka hadal ilmuhu waxyaabaha uu ku fiicanyahay iyo waxyaabha uu u baahanyahay in laga caawiyo. Waa in aad ka hadashaa waxyaabaha warwarka kugu haya xaga waxbarashda ilmahaaga.
- Waa in aad ogsoontahay in baaritaanka iyo qiimaynta qaarkood ayna muujin dhibaatada.
- Marka macalinka iyo iskuulkuba ay qabanayaan shaqo fiican, u sheeg! amaanto waa wax fiican.
- Waa in aad dhagayse fiican nooqotaa. Isku day in aad su'aalo waydiiso.

Technical Assistance ALLIANCE for Parent Centers
8161 Normandale Blvd.
Minneapolis, MN 55437-1044
952.838.9000
952.838.0190 TTY
952.838.0199 fax
888.248.0822 National Toll-free
alliance@taalliance.org

www.taalliance.org

- Waa in aad isku taxalujiso sidii aad u fahmi lahayd waxyaabha laga hadlayo. Waydii in laguu faahafaahiyo, hadii loo baahdo si aad u fahamto.
- Waxa aad ilmahaaga arimhiisa ka taqaan ayaa muhiim u ah si go'aan loo gaadho.
- Qoraalada iskuulka, natiijada hor umarka (progress reports), iyo warbixin ku saabsan ilmaha Ayaa waxa ay gogoldhig u yihiin qorshaynta habka waxbarashada.

## Kulanka IEPka dib:

- Qoraalka IEP waa in aad guriga u qaadataa inta aanad saxeexin ka hor si aad u hubisid. In aad guriga ku fiirisaa waalidka way u fiicantahay. Hadii ay jirto qayb aanad ku raacsanayn, u sheeg skuulka si looga hortago wax iskhilaaf ah .
- Qoraalka IEP waa in sanadkiiba mar dib loogu fiirsadaa si loo qiyaaso in ulajeedadii la gaadhay iyo in dib uhabayn lagu sameeyo.
- Waa in qoraalka IEP ku jirta wakhtiyada loobaahanyahay in ay kula socodsiiyaan hor umarka ilmahaaga, in ay wiig ama bishii tahay. Warbixintaasina waa mid tusaalo u ah hor umarka. Hadii ilmahaagu uuna samayn hor umar, waxa aad codsan kartaa kulanka kooxda IEP si dib loogu eego wixii isbadal ahna lagu sameeyo. Ama waxa aad uwici kartaa macalinka uqaabilsan waxbarashada gaar ahaaneed ee ilmahaaga si aad ugala hadasho wixii isbadal ah ee loo baahanyahay.
- Waxa aad codsankartaa kulan IEP hadii aad u aragto in loo baahanyahay. Mararka qaarkood waxa dhici karata in kulan la qabto si looga wada hadlo in isbadal lagu sameeyo IEP. Ama, waxa aad telafoon kula hadli kartaa macalinka waxbarashda gaar ahaaneed ee ilmahaag si wixii isbadal ah lagu sameeyo IEP.
- Hadii ay dhacdo in aad telafoonka ku samayso isbadalka, waa in aad codsataa in koobi ga IEP laguu soo diro.